

Xaashida xaqiiqada e Injirta Madaxa

Muxuu yahay?

Injirta madaxa waa cayayaan yaryar oo ku nool timahaaga, xiribaha, iyo suuxiyaha indhaha. Waxay u baahan yihiin inay dhooqaan dhiigaaga si ay u noolaadaan, waxayna ku nool yihiin aaga qalfoofka madaxaaga. Cayayaankaan ayaan faafinin wax cuduro ah oo la ogyahay. Carruurta gaaray da'da dugsigay ayay ku badan tahay inay ku dhacdo injirta madaxa.



Sidee ayuu ku faafaa?

War wanaagsan: injirta ayaan boodi karin ama duuli karin. Way xamaartaan keliya. Waxaad qaadi kartaa injirta marka aad:

- ◆ Madaxa ku taabato madaxa qofka injirta qaba.
- ◆ Aad la wadaagto dharka, sida koofiyadaha iyo qoor xirka, qof qaba injir.
- ◆ Aad isticmaasho isla shanlada, buraashka, ama shukumaanka qof injir qaba.
- ◆ Aad ku seexato isla fadhiga, sariirta, ama barkinta qof injir qaba.



Xasuusnoow, qof kasta ayay injirtu geli kartaa timihiisa. Inaad qabto injirta madaxa sumad uma ahan nadaafad daro ama inaad wasaq badan tahay.

Sideen ku ogaanayaa haddii aan qabo cudurka?

Waxaad qabi kartaa injir adiga oon ka warqabin. Inta badan dadka ayaa cuncun ka qaada injirta. Haddii injir ku gasho, waxaa laga yaabaa inaad qabto astaamahaan:

- ◆ Inaad dareento xanxanto kaa haysa madaxa ama in wax ku soconayaan.
- ◆ Inay hurdadu ku dhibto sabab la xiriirta in injirtu ku soconaysa madaxa marka aad mugdi ku jirto.
- ◆ Madaxa ayaad xoqaysaa ilaa ay nabaro kaasoo baxaan. Nabaradaan ayaa caabuuq qaadi kara.
- ◆ Aad ku aragto injirta madaxaaga. Waxay u egyihiin nabaro madoow ama cayayaan yaryar, oo cadcad.




Sidee ayaan iskaga difaaci karaa?

Waad iska difaaci kartaa injirta adiga oo alaabtaada aan dadka la wadaagayn.

Xaqiiji inaad:

- ◆ Taabsiin madaxagaaga madaxa qof kale.
- ◆ Aadan la wadaagin dharka sida koofiyadaha, qoor xirka, ama jaakadaha.
- ◆ Inaad adeegsan shanlada, buraashka, ama shukumaanka qofka.
- ◆ Aadan ku seexan isla sariirta, fadiga ama barkinta qof injir qaba.



Sidee ayaan u daryeelayaa naftayda ama qof qaba Injirta Madaxa?

Waxaa jira daawooyin aad kasoo iibsano karto dukaanka si aad u dawayso injirta. Raac tilmaamaha ku qoran bokiska daawada si taxadar leh. Kadib adeegsiga daawada, markale ha dhiqin timahaaga 1-2 maalmood. Tilmaamaha daawaynta qaarkood waxaa kamid ah:

- ◆ Kadib 8-12 saacadood oo daawadu kuu marsanayd, adeegso shanlo isku shiilan si aad usoo xaaqdo injirta ku hartay madaxaaga.
- ◆ Shanlee timahaaga 2-3 maalmood kasta muddo 2-3 asbuuc ah si aad uga xaaqdo injir kasta oo aadan arkin.



Si aad u xaqiijiso inaan injir ku gelin markale, waxaad u baahan tahay inaad:

- ◆ Mashiinka ku dhaq asagoo kulul (130°F) oo qalaji alaab kasta oo aad adeesatay intii lagu jiray 2 maalmood kahor daawaynta. Alaabtaan ayaa noqon kara dharka, harqadaha barkinta, go'yaasha, iyo gogosha.
- ◆ Buufi dhulka, fadhiga, iyo alaab kasta oo kale oo aad ku fariisatay.
- ◆ Ku rid shanlooyinkaaga iyo buraashyada biyo kulul (130°F) muddo 5-10 daqiiqo ah.

Goorma ayay tahay inaan dhakhtar waco?

Inta badan dadku uma baahna inay u tagaan dhakhtar si uu injirta uga daweyo, laakiin waa inaad dhakhtar la xiriirto haddii aad wali qabto injir kadib daawaynta buuxda. Dhakhtarkaaga ayaa kuu badeli kara daawo xoog badan sida Ivermectin.



Si aad Xog badan Uga ogaato: Booqo Webseedka Injirka oo ah www.cdc.gov.